


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



**TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA**

**Maarso 2022**

## Warbixin kooban


Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Maarso 2022 ayaa gaaray 129.92, marka la barbardhigo 127.61 bishii Febraayo 2021.

Isbedel bileedka, Maarso 2022, marka la barbar dhigo Febraayo 2022, ayaa sare ukacay 1.80 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ee bile ah, ayaa ka yimid qiimaha Cuntada iyo cabitaanada oo gaaray (2.68 boqolkiiba). hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha qutul daruuriga, cimilada oo aan hagagsaneyn darteed iyo abaaro sababay wax soo saar yarida iyo sare u kaca qiimaha cuntada qeybaheeda kale duwan ee badeecadaha. (Jaantuska2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Maarso 2021 iyo Maarso 2022) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB sare u kacay 6.08 boqolkiiba.

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Maarso 2022 (Dec 2014 = 100)

Tusaha Sicirka Badeecadaha, Janaayo 2022	
Tusaha bishan (Maarso 2022)	129.92
Tusaha bishii hore (Febraayo 2022)	127.61
Tusaha sanadkii hore (Maarso 2021)	122.47
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	1.80%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	6.08%



### Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Maarso 2022

War bixin bileedka bisha Maarso 2022 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Maarso 2022

Heerka sicir-bararka bisha Maarso 2022 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maarso 2021 iyo Maarso 2022.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa sare u kacay 6.08 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maarso 2021 iyo Maarso 2022.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ee Maarso 2022 ayaa sare u kacay 1.80 boqolkiiba, marka labarbardhigo hoos u dhac gaaraya 0.55 boqolkiiba bishii Febraayo 2022.

## Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Maarso 2022.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi kacay 2.68 boqolkiiba, bishii Maarso 2022 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 1.24 boqolkiiba bishii Febraayo 2022. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 11.97 boqolkiiba bishii Maarso 2022. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 12.65 boqolkiiba Febraayo 2022.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa sameeyey sare u kac gaaraya 1.66 bishii Maarso 2022 marka labarbardhigo 0.00 boqolkiiba Bishii Febraayo 2022. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 3.66 boqolkiiba bishii Maarso 2021. Marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaraya 3.39 bishii Febraayo 2022.

## Dhammaan qeybaha TSB-da iyo qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta : NBS

War bixin bileedka bisha **maarso 2022** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Maarso 2022 (Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa sare u kacay 11.97 boqolkiiba, 12billod ee la soo dhaafay Maarso 2021 iyo Maarso 2022. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid cuntada (+12.54 boqolkiiba) boqolkiiba, Gaar ahaan burka (+41.67 boqolkiiba) Saliida iyo Dufanka (+73.03 boqolkiiba) iyo hilibka (+13.45 boqolkiiba) iyo qudaarta (+17.97 boqolkiiba).
- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 4.90 boqolkiiba bishii Maarso 2022. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid qalabka caafimaadka oo gaaray (+11.36 boqolkiiba) iyo adeega caafimaadka (58.14 boqolkiiba). iyo Farsamadda iyo daaweynta ilkaha (+4.35 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa la diiwaangaliyey sare u kac sanadle oo gaaray 3.66 boqolkiiba Maarso 2022. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid korontada, gaaska iyo shidaalka (+4.55 boqolkiiba) sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid shidaalka dareera ah (+44.95 boqolkiiba) iyo gaaska wax lagu karsado oo gaaray (11.11 boqolkiiba)
- **Gaadiidka** ayaa muujiyey sare u kac sanadle oo gaaraya 3.16 boqolkiiba Maarso 2022. Kor u kaca ugu badan ayaa ka yimid adeega kala gudbinta agabka shaqsi ahaaneed oo gaaray (+25.61 boqolkiiba). Sare u kaca waxaa ka qeybqaatay shidaalka gaar ahaan Baasiinka oo gaaray (50.00 boqolkiiba) iyo Naftada (+47.06 boqolkiiba).


### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha 2022 (-)

- **Tubaakada** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi hoos u dhacay -32.67 boqolkiiba bishii Maarso 2022. boqolkiiba). Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qaadka oo gaaray (-45.00 boqolkiiba). Hoos u dhaca waxaa saameeyey isbedelka caadiga ah ee qiimaha qaadka.
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya -9.57 boqolkiiba Maarso 2022. Hoos u dhaca waxaa sababay alaabooyinka daryeelka oo qiimahoodu gaaray (-6.39 boqolkiiba). boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **maarso 2022** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## B. Qeybaha ugu weyn ee saameeya TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Maarso 2022  
(Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha 2022 (+)

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi kacay 2.68 boqolkiiba, bishii Maarso 2022. Sare ugu badan ayaa dhashay qiimaha cuntada (+2.92 boqolkiiba). Qiima kororka waxaa ka qeyb qaatay Saliida iyo dufanka oo gaaray (+21.51 boqolkiiba) fruits/miraha (+3.64 boqolkiiba) and qudrada (+2.77 boqolkiiba).

### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Maarso 2022 (-)

- Guud ahaan, ma jarin wax qiima dhac bille ah oo muuqday bishii Maarso 2022

## Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha 2022 ee habka (COICOP)

War bixin bileedka bisha **maarso 2022** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Maarso 2021 TSB	Febraayo 2022 TSB	Maarso 2022 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
<b>Dhamaan qeybaha TSB</b>	100.00	122.47	127.61	129.92	1.80	6.08
Cuntada & Cabitaanada	46.04	123.81	135.01	138.63	2.68	11.97
Tubaakadda	1.25	128.44	86.47	86.47	0.00	-32.67
Dharka & Kabaha	5.03	145.31	147.53	147.53	0.00	1.53
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	115.68	117.95	119.91	1.66	3.66
Agabka Guryaha	2.93	112.61	109.53	109.53	0.00	-2.73
Caafimaadka	5.00	153.63	161.16	161.16	0.00	4.90
Gaadiidka	3.77	107.73	109.17	111.13	1.79	3.16
Isgaarsiinta	2.80	102.78	103.03	103.03	0.00	0.24
Hawo bedeleshada & dhaqanka	1.00	101.90	101.64	103.85	2.17	1.91
Tacliinta	4.00	109.80	109.11	109.11	0.00	-0.63
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	138.44	133.78	136.05	1.70	-1.73
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	121.87	108.95	110.21	1.15	-9.57

#### Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


#### Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Abriil 2022 waxaa la baahin doonaa 15 Maajo 2022. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistikada, Fadlan booqo Bogena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

**Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Maarso 2022 marka loo eego COICOPka**

**Dhamaan qeybaha TSB-da**

qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka coicop



**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Maarso 2022** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia